

H B M A G A T O

**FAAFINTA**

**RASMIGA AH**

**الرسمية**



**الجريدة**

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMALIYA

الجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 10aad Muqdisho, 28 Seb. 1982, L. 1 R 9

FAAHFAAHIN BIL SOO BAXA

جريدته شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMADU waa 5 Shiln lambar waliba—RUKUNKA: Sannadii waa Shs. 100 Somaliya gudaheeda—dibaddeedana waa Shs. 300. Ruknka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaa-bmaa 1 Janayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxoo ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanka waxaa a weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah—lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

S H A R C I

QAYBTA

KOWAAD

W. M.

QAYBTA

LABAAD

XEER

XEER WASAARADDA H.G, L. 8 30 Seb. 80,

Cad dhul Dawladeed gadatay, gacantana loo geliyey (Libera Disponibilita

J.L. Sucaada Maxamed Hodon (Hibo) Bogga 786 kuna fadhiya mq. 114.

Cad dhul Dowladeed la siiyey J.L. Cali

Maxamuud Maxamed kuna fadhiya » 787 mq. 786.

**XEER WASAARADDA GAASHAANDHIGGA L. 9 ee 28**  
Agoosto 1982, Xeer Nidaamiyaha Fulinta Dilka ah oo ku dhawaaqan Maxkamadda Dagaalka ee Ciidammada.-

### **WASIIRKA WASAARADDA GAASHAANDHIGGA**

**ISAGOO ISTICMAALAYA:** Awoodda uu siinayo Qod. 70 XHCCD;

**ISAGOO TIXGELIYEY:** Xeerka Madaxweynaha J.D.S. L.26 ee 14.8.1982, oo lagu dhisay Maxkamadaha Dagaalka ee Ciidammada;

**ISAGOO GARTAY:** Baahida loo qabo in la soo saaro Xeer Nidaamiyaha fulinta Xukunnada Cigaabta Dilka ah oo ay ku dhawaaqan Maxkamadaha Dagaalka ee Ciidammada, iyadoo la dhawrayo Xeerarka Cigaabaadka iyo kuwa ku dhaqanka waqtiga Dagaalka;

**MARKUU ARKAY:** Qod. 277 XCCD oo awood u siinaya Guddoomiyaha Maxkamadda Dagaalka ee Ciidammada cayimaadda goobta lagu fulinayo xukunnadaas.

### **WUXUU XEERAYAA**

Qod. 1aad

(Fulinta Xukunnada Cigaabta Dilka ah)  
Marka Xukunka Cigaabta Dilka ah uu u dhaqan galo si kama dambeys ah (divenuto irrevocabile) sida uu qabo Qod. 69 XHCCD Xeerilaaliyaha Guud, ama ku Xigeenkiisa, wuxuu si deg deg ah qoraal ugu ogeysiinayaa Maxkamadda Dagaalka ee Ciidammada oo ku dhawaaqday Xukunka, Maxkamadda Sare ee Ciidammada Qalabka Sida iyo Wasiirka Wasaaradda Gaa-shaandhigga.

Qod. 2aad

(Qoraallada Galdacwadeedka)

Maxkamadda Dagaalka ee Ciidammada marka loo soo qoraal tebiyo kama dambaysnimada Xukunka Ciqaabta Dilka ah, waxay cayimaysaa taariikhda, saacadda iyo goobta fulinta, iyadoo la siinayo Amarka la xiriira fulintaas Koox Boliiska Dableyda ah oo ka tirsan Ciidanka Deegaankaas ama Colka uu ka tirsan yahay Askariga Xukuman.

Qod. 3aad

(Fulinta Xukunka)

1. Xukunka Ciqaabta Dilka ah waxaa lagu fulinayaa Toogasho iyadoo lagu isticmaalayo Ciidammada ku xusan Qodobka hore oo uu hoggaaminayo Xeerilaa-lyaha Guud ama ku Xigeenkiisa.

2. Fulinta Xukunka waxaa ka soo qayb galaya, Wakiilka Xafiiska Xeerilaalinta Guud ee Ciidammada iyo Kaaliyaha Maxkamadda ka sokow, hal Takhtar uu magacaabo Xafiiska Xeerilaalinta iyo Wadaad aqoon u leh Diinta uu aaminsan yahay Xukumanaha haddii uu weydiisto.

Qod. 4aad

(Dhismaha Kooxda Fulinta)

Kooxda fulinta waxay u dhismaysaa saddex unug oo sidata Hubka gaarka ah (Arma individuale), saamad iyo iyagoo u lebisana habka Dagaalka, iyadoo madax looga dhigayo hal Sarkaal. Waxaana amraya fulinta Xeerilaaliyaha Guud ama ku Xigeenkiisa.

Qod. 5aad

(Habka Fulinta)

QAYBTA

KOWAAD

S H A R C I

Sharci L. 31 taariikh 2 Set. 82, ansaxin Sharciga Xuquuqda Dadka Ciidamada Qalabka sida ka tirsan ee la wareejiyay.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Golaha Shaabiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad  
(Ansixin)

1. Waxaa la ansixiyay Sharciga Lambar 19 ee 26.5.82, kuna saabsan Xuquuqda Dadka Ciidamada Qalabka sida ka tirsan ee la wareejiyay, qodobadiisa 1ad, 3aad, 4aad, iyo 5aad.
2. Ansixinta qodobada kor ku xusan waxay ka bilaabanaysaa maalinta uu dhaqan galay isla Sharcigan Kor ku xusan.

Qod. 2aad  
(Beddelaad)

Qodobka 2aad ee Sharciga kor ku tilmaaman, waxaa loo bedelay sida soo socota:

Laga bilaao taariikhda wareejinta, xubnaha Ciidamada Qalabka sila ee la wareejiyay waxay ka mid noqonayaan Shaqaalaha Qaranka ee Rayadka ah, waxayna la soo wareegayaan xuquuqda u bislaatay muddaday ka tirsanaayeen Ciidamada.

Qod. 3aal  
(Dhaqangal)

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa laga bilaabo marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.